
Anthrax



# Kud (Anthrax)

## Waa Maxay cudurka Kudka?

Cudurka kudka waxa weye cudur ay sababto nooc ka mid ah bakteeriyada. Wuxuu kugu ridi kara xanuun leh habab badan oo kala duwan, waxay ku xiran tahay sida aad cudurka u qaaday. Wuxuu sababi kara cudurka maqaarka, ama xanuun daran oo ku dhaca dheef shiidka "cunto sumaysan." Qaab kale ee cudurka lagu qaado waa "ku neefsashada" kudka – wuxuu dhalinaya marka aad bakteeriyada ku neefsatid. Calaamooyinka cudurka sida caadiga ah waxay soo baxayaan todobo maalmood gudahgooda (siiba laba ilaa shan maalmood) marka aad cudurka qaadid ka dib. Calaamooyinka waxay ku xiran yihiin qaabka cudurka loo qaado:



*Bakteeriyada cudurka kudka*

- **Cudurka kudka ee (maqaarka)** wuxu ku bilaabanaya nabar soo baxay ee maqaarka. Hal ama laba maalmood gudahooda, wuxuu noqonaya nabar biyo galeen, ka dibna wuxuu noqonaya boog aan xanuun lahayn, oo dhexda midab madow ku leh. Qanjirada ku dhow boogta waxay noqonayaan kuwo barara. Cudurka kudka maqaarka waxa si fudud loogu daweyn kara daawada disha jeermiska cudurada bakteeriyada (antibiotics).
- **Cudurka kudka ee Mindhiciirka** waxa weye mid aad u dhif ah. Wuxuu ku bilowda lallabo, rabitaanka cunada oo kaa luma, matag iyo qandho. Calaamooyinkaas waxa ku xiga calool xanuun, matag dhiig ah, iyo shuban aad u daran. Daawada disha jeermiska cudurka (antibiotics) oo horey loo qaato ayaa muhiim ah haddii aad qabtid cudurka kudka mindhiciirka.
- **Cudurka kudka neefsashada** wuxuu ku bilabanaya calaamo u-eg hargab (qufac,qandho, xanuun isdab-joog ah oo muruqaha ah). Calaamooyinkan waxay ku dhamaan karaan laba ilaa saddex maalmood, ka dibna ma muuqanayaan hal ilaa laba maalmood. Ka dibna cudurka wuu soo laaban kara, wuxuuna dhalinaya dhibaatooyin daran oo ku dhaca sambabaha, neefsashada oo dhib kugu noqoto, iyo arga-gax. In la daweeyo mooyee, cudurka kudka neefsashada wuxuu noqon kara mid aad u khatar ah - wuxuu yahay mid dilaa ah ilaa boqolkiiba 90 xaaladood. Daaweynta cudurkan sanadkii 2001, qadarka dhimashada waxay ahayd boqolkiiba 40.

## Sidee uu kugu dhici kara cudurka kudka?

Marka bakteeriyada ay ku kooban tahayjirka korkiisa, bakteeriyada cudurka kudka xuub adag oo isku badbaadiyo oo lagu magacaabo spore ayer samaysata. Marka uu samaysto qaabka spore, cudurka kudka waa adag yahay si loo dilo. Waxyaalahan isboorayaasha ah sida dabaiiciga ah waxay ku jiraan ciida, halkaas ay ku noolaan karaan sanooyin badan. Xoolaha sida lo'da, idaha, fardaha iyo riyaha waa ku dhici karaa cudurka haddii la xiriiraan ciid ku jirta cudurka kudka.

Dadka waxay ka qaadi karaan cudurka kudka xoolo qaba cudurka, ayagoo ka qaadanayaan haraga suufka ah iyo waxyaabo kale ee ka soo baxa xoolaha qaba cudurka, ama ayaga oo cuna hilibka xoolaha qaba cudurka. Sida caadada ah arrimahan cudurka kudka dadka ku dhaco aad buu dhif u yahay.

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH
Communications Office
625 North Robert Street
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-4989
www.health.state.mn.us

Somali

# Kud (Anthrax) – Pog 2

Weerarkii cudurka kudka ee sanadkii 2001, dadka waxay ku qaadeen cudurka kudka neefsashada iyo maqaarka labadaba taabashada waraaqaha boostada loogu keeno. Waxa kale oo la ogaaday in bakteeriyada cudurka lagu si deyn karo hawada meel ay joogaan tiro badan oo dad ah. Natiijada waxay noqon kartaa dad badan in ay ku neefsadaan qaadaana cudurka kudka neefsashada.

## Ma ka qaadi karta cudurka dad kale?

***MAYA!*** Waxa keliya oo ka qaadi karta waxyaalaha isboorayaasha (spore) in aad ku neefsatid, cuntid hilib taabtay cudurka, ama isboorayaasha (spore) ay taabtaan maqaarkaaga. Dadka qaba cudurka kudka awood uma laha in ay u gudbiyaan cudurka dadka kale.

## Maxaa loogu tixgeliyey cudurku in uu noqon karo hub argagax ah?

Cudurka kudka mar hore ayaa loo isticmaalay hub ahaan in wax lagu weeraro bishii Oktoobar 2001, waxa loo isticmaalay taabashada waraaqaha boostada si loogu faafiyo waxyaalaha isboorayaasha (spore) cudurka kudka. Laba iyo labaatan qof ayaa laga baaray cudurka kudka  shan ka mid ah ayaa ku dhimatay.

Waxa kale oo laga soo ogaaday wadamada Maraykanka iyo Uruka Soofiyeetka labadaba in ay soo kashifayn in loo isticmaalo cudurka kudka hub ahaan. Waxa la aaminsan yahay in wadamo kale ay haatan sii wadaan dadaalkaas.

Cudurka kudka wuxu leeyahay tilmaamooyin kala duwan kaas oo Xarumaha La Dagaalanka iyo Ka Hortaga Cudurka ee wadanka Maraykanka (U.S.) isticmaaleen si ay u ogaadaan suuragalka cudurkan in loo isticmaalo hub lagu argagaxiyo naflayda:

- Inkasta oo aan qofna qofka kale u gudbin karin, haddana weli si fudud ayuu u faafi kara cudurku.
- Wuxuu saamayn ku yeelan kara caafimaadka dadka, waxaana ka mid ah tirada dhimashada oo kororta.
- Wuxuu sababi kara wel-wel baahsan iyo carqaladayn ku dhaca bulshada.
- Qiyaas gaar ah ayaa muhiim ah si loogu gaashaanto suuragalka weerarka cudurka kudka.

## Ma la daweyn kara cudurka kudka?

Dhamaan noocyada cudurka kudka waxa lagu daweyn kara dawo disha jeermiska cudurka (antibiotics). Waxa muhiim ah in sida ugu dhaqsaha badan loo bilaabo daweynta. Waxa laga yaaba in laga hortagao cudurka haddii dadka qaaday cudurka u bilaabaan daweynta sida ugu dhaqsaha badan.

## Ma laga hortagi kara cudurka kudka?

Isku daweynta dawada disha jeermiska cudurka waqti hore, dadka laga yaabo in ay qaadeen cudurka kudka, waxa weye habka ugu wanaagsan ee ka hortaga ah.

Waxa kale oo jira tallaal loogu talagalay cudurka kudka, ka soo isticmaala ciidanka militeriga ah. Waxa la qaadanaya lix tallaal si looga badbaado, waxa ku xiga kordhin sanadeed. Hase yeeshee, qalabka tallaalka wuu kooban yahay, lagamana helo dhakhaatiirta madaniga ah. Sida tallaal kasta oo kale, wuxuu leeyahay dhibaatooyin qaar ka mid ah.Waxa kale oo jirta hab aan lagu ogaan karin goorta ama halka lagu koobay qalabka tallaalka oo dhici karta ee loogu jawaabo waqtiga wax lagu soo weeraro. Sababahaasi dartooda, tallaalka guud ee bulshada lama soo jeedin.

## Ma in aan gacanta ku haysta xoogaa dawada disha jeermiska cudurka (antibiotics) – si taxadar ahaan?

***MAYA!*** In aad nafsadaada siisid dawada disha jeermiska cudurka dhibaato ayey kuu keeni karta. Dawada disha jeermiska cudurka (antibiotics) waxa lahaan karta dhibaato halis ah-gaar ahaan haweenka uurka leh, caruurta, iyo dadka aleerjikada ku ah dawada disha jeermiska cudurka (antibiotics) .Isticmaalka xad-dhaafka dawada disha jeermiska cudurka waxay caawin karta dhalashada "jeermis la qabsaday dawadana ay wax ka tari karin" – bakteeriyadana ma lagu daweyn karo wax badan dawada disha jeermiska cudurka (antibiotics).

Hay'adaha caafimadka bulshada, isbitaalada, iyo isbitaalada yar-yar ee Minnesota si joogta ah ayaa foojignaan ugu jiraan hawsha nooc kasta oo cudur aan caadi ahayan – waxaana ka mid ah suuragalida in lagu soo weerar cudurka kudka. Haddii la arko weerar suurgal ah ee cudurka kudka, Waaxda Caafimaadka Minnesota iyo waaxaha caafimaadka xaafadaha si dhaqso ah ayey u hawl-galayaan. Waxay qaadayaan tallaabooyin lagu ogaanayo dadka qaaday cudurka – waxayna hubinayaan in ay siinta dawada disha jeermiska cudurka (antibiotics).

## Ma jiraa baaritaan la xiriira cudurka kudka – ama baaritaan la xiriira in uu qofka uu qabo cudurka kudka?

Cudurka kudka neefsashada sida caadiga ah waxa lagu ogaada baaritaanka bakteeriyada cudurka kudka in laga baaro dhiiga, ama dheecaanka ka yimaada sambabada ama dhuumaha neefsashada. Cudurka kudka maqaarka waxa lagu ogaada baaritaanka maqaarka.

***Ma jiraan baaritaan kuu sheegi kara in aad qaaday cudurka kudka.***

## Maxaan samayn doona haddii ay ila noqoto in aan qaaday cudurka kudka?

Haddii aad dareensan tahay ficilo shaki ah waxa aad la xiriirta hawl-wadeenada fulinta sharciga ee xaafadaada. Ma jiro hab lagu hubiyo in aad qaaday cudurka kudka. Laakiin haddii aad aaminsantahay in cudurka qaaday – ama aad qabtid dareen kale oo la xiriira caafimadka – waxa aad la hadasha dhakhtarkaaga. Iyo haddii si fudud aad u dareesan tahay wel-wel iyo walaac weerar suuro-gal ee la xiriira argagaxa-naflayda, waxa aad ku fikerta in aad la xariirtid dhakhtarka khaaska u ah maskaxda.